IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 2da Luulyo 1988, L. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadaeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 14 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho Bog; Heshiis Amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika — 502

SHARCI L. 15 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, Mash.Is/ta » 503

SHARCI L. 16 ee 18 Juun. 1988, Sharciga Maamulka Huteelada Dawladda. » 504

WAKAALADDA MADBACADA QARANKA

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 33 ee 13 Juun. 1988, Meel marin Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Bankiga H. Afrika » 505

DECREE No. 33 on 13 Jun. 1988, Instrument of ratification. » 506

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 34 ee 13 Juun. 1988, Meel marin Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa H. Afrika » 507

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 35 ee 20 Juun 1988, Soo Saarid Lacag. » 508

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 15 ee 2 Juun. 1988, Magacaabid Kuxigeen Gud doomiye Golaha Shacbiga Degaanka. » 509

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Sabriye Siidow Rooble L. 344. » 510

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Luul Maxamuud Faarax L. 345 » 511

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid J/War. L. 29121 ku qoran Cabdulqaadir Yuusuf Diiriye L. 346 » 512

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 8.5.88, J/War. iyo B/Kayd ku qoran Axmed Maxa med Xasan L. 347 » 513

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.6.88, Lu mid B/Keyd L. 7235 ku qoran Xuseen Macalin Cabdulle L. 348 » 514

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED 8.12.87, Lumid J/War. L. 0520415 ku qoran Kaamil Ciise Habane L. 349 » 515

| | | |
|---|---|---|
| MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 12.6.88, Lumid J/War. L. 0692447 ku qoran Cabdullaahi Maxamed Faarax L. 350 | » | 516 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.6.88 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Maryan Sh. Jaamac L. 351 | » | 517 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.6.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi Cabdullaahi Saciid L. 352 | » | 518 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.6.88 Lumid Jeeg War. L. 0121771 ku qoran Xaaji Weheliye Raage Culusow L. 353 | » | 519 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.6.88 Lumid Buug Keyd L. 17058 ku qoran Cali Caydiid Xasan L. 354 | » | 520 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.6.88 Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cismaan Ismaaciil L. 355 | » | 521 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.6.88 Lumid Jeeg War. L. 0149383 ku qoran Saciid Qaxdaan Taabid L. 356 | » | 522 |
| MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.6.88 Lumid 17 Jeeg War. ku qoran X. Axmed Maxamed Faarax L. 357 | » | 523 |

## QAYBTA KOWAAD
## SHARCI

Sharci Lambar 14 Tr. 13 Juun. 1988 Oggolaansho Hesh iis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika «Mashruuca War Isgaarsiinta».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

### Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska Amaaheed oo dhex maray D/J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika oo Wakiil ka ah Sanduuqa Sugan ee Nijeriya (NTF), kuna saabsan Amaah Lacag ah oo loo yaqaan BUA 6.000.000, oo loogu talo galay Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL).

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbidJaan ee Dalka Ivory Coast taariikhdu markay ahayd 11.2.1988.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo Lifaaq u ah.

### Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la Waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada Heshiiskan.

### Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu mee lmariyo Heshiiskan.

### Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 15 Tr. 13.6.1988, 13 Juun. 1988 Oggolaa sho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika «Mashruuca War Isgaarsiinta».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska Amaaheed ee dhex maray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saa bsan amaah lacag ah oo loo yaqaan FUA 9.000.000 oo loogu talo galay Mashruuca war Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL).

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbidJaan ee Dalka Ivory Coast, Tr. markay ahayd 11.2.1988.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran qodobka 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu mee lmariyo Heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharciga lambar 16 ee 18ka Jun. 1988: Sharciga Maamulka Hoteellada Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska waxay la geli kartaa Shirkado iyo Maalqabeenka Soomaaliga iyo kuwa Shisheeye heshiis faa'iido wadaag (Joint venture) oo ku saabsan Maamulka Hoteellada. iyadoo la dhawrayo shuruudaha Sharciga Maalgelinta Shisheeye.

Qod. 2aad

Shaqaalaha Hoteellada waxaa laga dhigay Heshiisley, iyadoo hadda kaddib lagu dhaqi doono Sharciga lambar 26 ee 5ta Luulyo 1984, kuna saabsan Shaqaalaha Warshadaha.

Qod. 3aad

Waxaa la buriyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Jun 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 33 ee 13.6.1988 Meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika. kuna saabsan Mashruuca war isgaar siinta ee (1 PANAFTEL).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqr adda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 14 ee 13ka Juun 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggo laaday Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

### Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska Amaaheed ee dhexma ray D/J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika oo Wakiil ka ah SANDUUQA SUGAN EE NIJEERIYA (NTF), kuna saab san Mashruuca war Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL), laguna kala saxiixday magaalada AbidJaan 11kii Febraayo 1888.

### Qodobka 2aad

Heshiiskanu wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

### Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

UJEEDDO: Decree No. 33 of 13.6.1988, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no. 14 of 13.6.1988 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Foolowing Decree.

ARTICLE 1

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Bank acting on behalf of the Nigeria Trust FUND (telecomunications I (PANAFTEL) Project), signed at AbidJan on 11.2.1988, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 13.6.1988.

THE PRESIDENT OF SDR
Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lam. 34 ee 13.6.1988, Meelmarin heshiis amaaheed dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1PANAFTEL).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUUARKAY: Sharciga Lr. 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 15 ee 13ka Juun 1988, oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskan.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1PANAFTEL), laguna kala saxiixday magaalada AbidJaan 11kii Feberaayo 1988.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

UJEEDDO: Decree no of 13.6.1988, Instrument of ratifion.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law No. 15 of 13.6.1988 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agree ment.

HEREBY PROMULGATES

The Foolowing Decree.

ARTICLE 1

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund (telecomunications I (PANAFTEL) Project), signed at AbidJan on 11.2.1988, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the president of Somali Democratic Republic and shall Pub lished in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 13.6.1988.

THE PRESIDENT OF SDR
Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 20 Jun. 1988, Soo saarid Lacag.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82 Dastuurka JDS Xarafka 14aad iyo sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Qod. 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso 1961 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soomaalida;

ASAGOO TIXRAACAYA: Baahida loo qabo in la cad-deeyo tirada Lacagta Xaashida Cusub oo shilin Soomaaliga ah ee la doonayo in la soo saaro;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la soo saaro:

b) 50.000.000 (Kontonmalyan) oo xaashida 100 (boqol) Shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 5.000.000.000.= (shanbilyan) oo ah 50 horin «series» kana bilowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo ka dambeeya lambar 121 ilaa 170.

t) 30.000.000 (Soddonmalyan) oo xaashida 50 (konton) Shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 1.500.000.000.= (halbilyaniyonus) oo ah 30 horin «series» kana billowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo ka dambeeya lambar 116 ilaa 145.

Qodobka 2aad

Lacagta xaashida cusub oo ah min 100 iyo 50 shilin Soomaali oo qodobka kore lagu tilmaamay waxay leedahay summadaha u gaarka ah iyo tilmaamaha ku saabsan xagga farsamada iyo farshaxanka oo ku qeexan xeerka lambarkiisu yahay 67 ee 30.12.1982. Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saaravaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

WASIIRKA W.M. IYO L.
(Dr. C/raxmaan Jaamac Barre)

MADAXWEYNAHA J D S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA, L. 15 ee 2 Juun 1988,

Magacaabid Ku-xigeen Guddoomiye Gola Shacbi Degaan.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Degaanada iyo Maamulka Gobollada iyo Deg.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84, ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Go'aan Lr. DH/DJ/22.87 ee 17.9.87 ee Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Jowhar.

ISAGOO TIXGELIYEY: Warqadda Lr. XMD/GSHDH/750/87 ee 20.10.87 oo ah talada Guddoomiyaha M/D//G.SH.DH

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in Jagadii uu ka geeriyooday Guddoomiye Kuxigeenkii Golaha Shacbiga Degaanka D/Jowhar Marxuun Maxamuud Sheekh Cusmaan uu buxiyo J/le Nuur Ismaaciil Beed oo ahaa Xubin Guddiga Joogtada ee Golaha Degaanka Jowhar.

Qodobka 2aad

Waxaa la oggolaaday in ka banaanaatay Guddiga Joogtada ay buuxiso Saaqa Jaamac Aadan oo xubin ka ah Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Jowhar.

Qodobka 3aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 2.6.88.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Sabriye Siidow Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 J/War. Lambar kala yahay 0443720, 0443721, laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Afraad kuna jirto Lacag dhan midkiiba sh.so. 30.000, 37.500, kuna qoran magaca J/le Sabriye Siidow Rooble, sida ku cad warqadda Lambar 3876 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed Qeybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War. Lambar kala yahay 0443720, 0443721, oo laga sameeyay L/Afraad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto lac ag dhan midkiiba sh.so. 30.000, 37.500, kuna qoran magaca J/le Sabriye Siidow Rooble.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Afraad Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Sabriye Siidow Rooble lacagta cadadkeedu yahay isugeyn sh.so. 67.500, oo ku qoran J/War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 544

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Luul Maxam uud Afrax.

HADDUUTIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 J/War. Lambar kala yahay 0443718, 0443719, laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Afraad kuna jirot Lacag dha midkiiba sh.so. 30.000, 37.500, kuna qoran magaca J/le Luul Maxamuud Faarax sida ku cad warqad da lam. 5876 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed Qeybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War. Lambar kala yahay 0443718, 0443719, oo laga sameeyay L/Afraad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalyeed kuna jirto lacag dhan midkiiba sh.so. 30.000,37.500, kuna qoran magaca J/le Luul Maxamuud Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Afraad Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Luul Maxamuud Faarax lacagta cadadkeedu yahay isugeyn sh.so. 67.500, oo ku qoran J/War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 345

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdulqaadir Yuusuf Diiriye.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 29121 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Dhexe kuna jirto lacag dhan sh.so. 300.000 kuna qoran magaca J/le C/qaadir Yuusuf Diiriye sida ku cad warqadda Lr. 2367 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortament) J/War. Lr. 29121 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/B./Dhexe kuna jirto lacag dhan sh.so. 300.000 kuna qoran magaca J/le Cabdulqaadir Yuusuf Diiriye.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L.B.Dhexe in ay siiso J/le C/qaadir Yuusuf Diiriye lacagta cadeyntu tahay sh.so. 300.000 oo ah bedalkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysawax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 1.5.88,

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 345

MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL LASCANOD

HADDUU ARKAY: Dacwadda Hore uuna keenay Maxkamaddan J/le Axmed Maxamed Xasan Ganacsade Deggan Xamar Kaasoo sheegtay inay ka lumeen J/War. Lambar 0687668 Tr. 3.3.88, kana soo baxay L/Xarunta Xamar, iyo B/Keydka L.24556 ee isla laantaas waxaana ku jiray sh.so. 52,000 Buugga sh.so. 30.000 Jeegga.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69aad Sharciga L, 2 ee 9.9.65.

HADDUU OGAADAY: Waxay ku saabsan tahay Dacwadasi

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda B/Kaydka Bankiga Sare ku xusan iyo J/War. Isna Sare ku xusan kuna qoran magaca Axmed Maxamed Xasan ay ku jiraan sh.so. 52,000,÷30,000,/=(82,000) Kuwaasoo laga xaday Boorsadii ay ku jireen Taariikhdu markay ahayd 8.3.1988, Laascaanood.

WAXAA LA AMRAYAA

In Ninkaas loo sameeyo JWar. L. 0687668 Tr. 3.3.88 iyo B/Kayd L. 24956, ee ayna ku jiraan sh.so. 82,000 Beddelka kuwaas ka lumay 30 casho ka dib marka amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugaas iyo Jeegaas cusub ee la samayn doono lagu Wareejiyo Gacanta J/le Axmed Maxamed Xasan ama qof ka sita wakaalad sharci ah.

Laascaanood, 8.5.1988.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA SOL.

Maxamed Sh. Cabdi Maxamed.

L. 347

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY. Arjiga uu soo qortay J/le Xuseen Macallin Cabdulle.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay B/Kayd Lambar 7235 ee laga sameeyay L/Wadajir ee Bankiga Ganacsiga iyo kuna qoran magaca Xuseen Macallin Cabdulle sida ku cad warqadda lam. ee Bankiga Ganacsiga-iyo keydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Kayd Lr. 7235 lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/ta Wadajir kuna jirto lacag dhan sh.so. 3.123.33 kuna qoran magaca Xuseen Macallin Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Xuseen Macallin Cabdulle Lacagta cadadeedu yahay Sh.So. 3.123.33 oo ku qoran B/Kayd kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 348

MAXKAMADAA GOB. W/G/HARGEYSA

UJ: Decreeto Cusboonaysiin J/War. Lumay Lr. yahay 0520415 ee 16.9.87 sh.so. 50.000 ku qornaa Kaamil Ciise Habane laga sameeyay L/1aad Hargeysa.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay C/raxmaan Cali Xuseen ee 7.12.87 ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo J/War. ee lumay Lr. kor ku xusan yahay.

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/1aad ee Hargeysa ee Lambarkeedu yahay 001185 ee ku Tr. 8.12.87, ayna ku soo cadeeyeen in Jeegaas laga sameeyey L/1aad Hargeysa Lacagtiisuna dhan tahay 50.000 Shilin lana sameeyey Taariikhda sare ku qoran loona sameeyey Ninka ujeedada ku qoran.

MARKUU ARKAY: In J/War. ee lumay uu lacagtiisa iska leeyahay C/raxmaan Cali Xuseen.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga laamihiisa u wada diray iyo Xisaabaha Guud iyo Qaybta Sharciga.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69,70 ee Xeerka lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO,AAMIYEY.

In la kansan kareeyo J/War. ee lumay ee lambarkiisu yahay 0520415, loona cusboonaysiiyo C/raxmaan Cali Xuseen, cusboonaysiintana, Gacanta laga saaro isla markaas mudo 15 casho gudanood ah ka dib marka Faafinta lagu soo qoro, gacanta ha laga gelIyo C/raxmaan Cali Xuseen ama cid awood ka haysta.

W A X A A

Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyed L/Kowaad ee Hargeysa la farayaa in uu Nuqulka Go'aanka ku dhejiyo Bankiga Irdihiisa si Ciddii dan ka lihI cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

Hargesa, 9,12,87.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. W/G/HARGEYSA
Maxamed Yuusuf Caynaan.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: codsiga uu soo qortay J/le C/qaadir Maxamed Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 0692447, kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Faarax kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 laga sameeyay L/2aad sida ku cad warqadda Lr. 5564, ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WLXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lambar 0692447, kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Faarax, kuna jirto Lacag dhan sh.so. 50.000 lagana sameeyay Bankiga Ganacsi ga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad.

WAXAA LA AMRAYAA

L/2aad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le C/qaadir Maxamed Faarax, lacagta cadadk eedu yahay sh.so. 50.000 oo ah bedelkii J/War. oo kor ku xu san markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maal mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafin ta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenn.

Muqdisho, 12.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 350

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Maryan Sh. Jaamac Xaashi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 4 Jeeg War. ee Lambarradooda, Lacagtooda, Magaca ku qoran iyo Laanta laga sameeyey ay hoos ku qoran yihiin, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 400.000 sida ku cad warqadda lam. 6057 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1050025 | 100.000 | Cabdi Cadceed Cali | Burco |
| 1050026 | 100.000 | Cabdi Cadceed Cali | Burco |
| 1049984 | 100.000 | Bashiir Xaaji C/raxmaan | Burco |
| 1049985 | 100.000 | Bashiir Xaaji C/raxmaan | Burco |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran oo laga sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna kala qoran magacyada kor ku xusan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maryan Sh. Jaamac Xaashi Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 400.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 351

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Cabdullaahi Saciid;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku tilmaaman Lambarradooda, Lacagtooda, Magaca ku qoran iyo Laamaha laga sameeyey, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 sida ku cad warqadda lam. 5977 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1034187 | 100.000 | Maxamed X. Aadan Cilmi | Xarunta |
| 1034193 | 100.000 | Maxamed X. Aadan Cilmi | Berbera |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku tilmaaman oo laga sameeyey Laaamaha Xarunta iyo Berbera ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran Maxamed X. Aadan Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Cabdi Cabdullaahi Saciid lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 352

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Yuusuf Cali Cumar.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. Lambar 0121771 oo laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Soomaaliyeed LQ.X.G. kuna jirto lacag dhan sh.so. 500.000 kuna qoran magaca J/le Xaaji Wehiliye Culusow sida ku cad warqadda Lr. 6248 ee Bankiga Ganacsiga iyo keyka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0121771 oo laga sameeyay Laanta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 500.000 kuna qoran magaca J/le Weheliye Raage Culusow

WAXAA LA AMRAYAA

L/2aad Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Yuusuf Cali Cumar lacagta cadadkeedu yahay sh.so. 500.000 oo ku qoran J/War. oo kor ku xusan mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 353

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Caydiid Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd lam. 17058 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 1.745.434.04 kuna qoran magaca J.le Cali Caydiid Xasan si-da ku cad warqadda lam. ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 17058 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo K. Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.745.434.04 kuna qoran magaca J.le Cali Caydiid Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-liyeed in ay siiso J.le Cali Caydiid Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.745.434.04 oo ku qoran Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 354

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cusmaan Ismaaciil;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 8 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 3.700.000 kuna kala qoran Faadumo Cismaan Ismaaciil iyo Maxamed Cismaan Cismaaciil sida ku cad warqadda Lr. 5875 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.No. | Taariikh. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 0149961 | 3.5.88 | 500.000 | Fadumo | Cisman | Ismacil | Xarunta |
| 0149962 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0149963 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0149964 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0149965 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0149966 | » | 500.000 | » | » | » | » |
| 0149967 | » | 500.000 | Max'ed | Cisman | Ismacil | » |
| 0149968 | » | 200.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lambarradooda, Lacagtooda, Magaca ku qoran iyo Laamaha laga sameeyey ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ay kor ku xusan yihiin kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 3.700.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Maxamed Cismaan Ismaaciil lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 3.700.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga.

Muqdisho, 19.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ibraahim Macalin Abuukar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 0149383, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000/, kuna qoran magaca Saciid Qaxdaan Taabid, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, sida ku cad warqadda lam. 5627 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega lam. 0149383 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca Saciid Qaxdaan Taabid lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Ibraahim Macalin Abuukar lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 356

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## QAYBTA MADANIGA

## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Rooble Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 17 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.185.000/= kuna qoran magaca J.le X. Axmed Maxamed Faarax sida ku cad warqadda lam. 6049 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1156409 | 100.000 | X. | Axmed | Maxamed | Faarax | laad |
| 1156407 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156389 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156596 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156423 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156410 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156411 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 1156408 | 100.000 | » | » | » | » | » |
| 0708058 | 50.000 | » | » | » | » | » |
| 0708059 | 50.000 | » | » | » | » | » |
| 0708051 | 50.000 | » | » | » | » | » |
| 0708052 | 50.000 | » | » | » | » | » |
| 0708053 | 50.000 | » | » | » | » | » |
| 0708060 | 40.000 | » | » | » | » | » |
| 0708039 | 40.000 | » | » | » | » | » |
| 0708040 | 30.000 | » | » | » | » | » |
| 0708054 | 25.000 | » | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

## WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lambarradooda, Lacagtooda, Magaca ku qoran iyo Laanta laga sameeyey ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ay kor ku xusan yihiin, kuna jirto guud ahaan lacag

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xuseen Rooble Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.185.000/= oo ku qoran Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 357

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Guutaale Hiraabe;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 0531393 ee laga sameeyey Laanta Gaalkacyo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Maxamed Caamir Cilmi sida ku cad warqadda lam. 4959 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis. Guud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000/=;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega lam. 0531393 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L/Gaalkacyo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000/= kuna qoran magaca Maxamed Caamir Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Gaalkacyo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdi Guutaale Hiraabe lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 40.000/= oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 358

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Maxamed Diiriye;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga Wareega lam. 1159022-1159023 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G. kuna jirto lacag dhan min sh.so. 100.000/ isugeyn Sh.So. 200.000/ kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Diiriye sida ku cad warqadda lam. 6092 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee lam. 1159022-1159023 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000/= kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Diiriye.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Axmed Maxamed Diiriye lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000/= oo ku qoran labada Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 358/bis